


RAAGSAN

Faallo Kooban

Sebteember 2023

# Horumarinta Bixinta Adeegga Soomaaliya iyada oo Loo Marayo Talagelin Bulsho:

## Casharradii Laga Bartay Barnaamijka Talagelinta Bulshada ee Daadihiye

## Dulmar Kooban

Waxaa la isla gartay in muwaaddinka firfircoon ee la talada laga qaybgeliyay uu kaalin xasaasi ah ka cayaaro qaabaynta iyo joogtaynta hannaanka dawlad wanaagga. Ka qaybgelinta muwaaddiniinta ee siyaasad dejinta iyo tixgelinta baahiyaha iyo waxyaabaha hortebinta u leh waxa ay udub-dhexaad u tahay naqshadaynta iyo fulinta siyaasado guud iyo adeegyo dadweyne oo wax ku ool ah. Talagelinta muwaaddinka waxaa la ogaaday in ay si togan saamayn ugu leedahay bixinta adeegyada, iyada oo caddaymaha la hayo ay muujinayaan in ka talagelinta bulshada ee hannaanka go'aan qaadashada uu horseedi karo natiijooyin la xiriira sare u qaadidda bixinta adeegyada.

Dawlado badan ayaa waxa ay qaateen habab kala duwan oo muwaaddinka loo talageliyo sida nidaamka dawladda elektoroonigga ah (e-governance) kaas oo ka faa'iidaysanaya xogta iyo nidaamyada teknoolojiyada casriga ah, sidoo kalena sare u qaadaya hawlahooda, horumarinayana adeeg siinta ee muwaaddiniinta. Isbeddelkan ayaa dhaliyay faa'iidooyin la taaban karo sida kordhinta waxqabadka fiican, wax-ku-oolnimada, iyo sare u qaadidda fursadaha talagelinta muwaaddiniinta.

In kastoo dunidu horumar badan ka samaysay, haddana talagelinta muwaaddinka ee Soomaaliya waxa ay ahayd mid xaddidan sannado badan oo colaado iyo xasillooni darro ah agweed, qaab-dhismeedka dawladeed oo daciif ah, iyo adeegyada iyo kaabayaasha aasaasiga ah oo jirin. Hase ahaatee, sanadii danbe waxaa xoogaa horumar togan oo la sameeyay ayaa horseeday in la kordhiyo talagelinta iyo ka qaybgalka muwaaddinka ee hannaanka dawladnimo ee dalka. In kastoo horumarradan la sameeyay, haddana dadaallada la xiriira arrintan ayaa ahaa kuwo aan midaysnayn, iyada oo ay adag tahay gaaridda goobaha qaar ayna qaybaha bulshada ee laga tirada badan yahay weli qayb ka maqan yihiin geeddi-socodka go'aan qaadashada.

Faallo siyaasadeedkan kooban waxa uu dulmar guud ka bixinayaa sida talagelinta muwaaddinku ay qayb uga noqon karto horumarinta bixinta adeegyada ee Soomaaliya iyada oo lagu salaynayo casharradii laga bartay Barnaamijka Talagelinta Bulshada ee Daaddihiye. Daadihiye ayaa waxa uu qaatay hannaan loo dhan yahay si codadka muwaaddiniinta looga maqlo miiska go'aannada iyada oo uu siinayo wadiiqooyin lagu xoojinayo aragtiyaha kala duwan ee bulshada, ururinta iyo u gudbinta daneeyeyaasha si looga dodo caqabadaha jira, jid horusocod lehna loogu bixiyo bulshooyinka. Waxa uu sidoo kale barnaamijkan dhabbaha u xaarayaa in Soomaaliya ka gudubto hadalhaynta koox yar oo badanaa iyaga keliya ah lagala doodo arrimaha jira si go'aamada guud xog loogu biiriyo.

Faalladan waxaa lagu soo bandhigayaa talooyin lagu hirgelin karo, laguna taageeri karo istaraatiijiyo talagelin bulsho oo wax ku ool ah oo dalku yeesho. Iyada oo lala kaashanayo saaxiibbada caalamka, Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo maamul goboleedyada waa in ay taageeraan oo maalgeliyaan hindiseyaasha lagu xoojinayo talagelinta iyo ka qaybgalka muwaaddiniinta.

## Tusmo


Hordhac...............................................2

Aragtiyaha Dunida ee Talagelinta Bulshada ee qaabaynta bixinta adeegyada guud .................................2

Xaaladda Adeeg Bixinta iyo Talagelinta Muwaaddiniinta ee Soomaaliya ..........4

Barnaamijka Daadihiye ee Talagelinta Muwaaddinka ....................................4

Aragtida Isbeddelka ee Daadihiye .......5

Tijaabada Talagelinta Bulshada ee Muqdisho ...........................................6

Natiijooyinka muhiimka ah ee ka soo baxay sahanka cilmi-baarista ........6

Casharrada Laga Bartay .......................7

Kor-u-qaadista iyo Habaynta Daadihiye............................................8

Talooyin .............................................8

Gunaanad ...........................................9

Tixraacyo .........................................10




## Hordhac

Talagelinta muwaaddinka waa arrin udub-dhexaad u ah dawlad wanaagga. Bangiga Adduunka waxa uu talagelinta muwaaddinka ku qeexaa isdhexgal laba dhinacle ah, oo u dhexeeya muwaddiniinta iyo dawladaha ama hay'adaha gaarka loo leeyahay ee qaybta ka ah wada-hadallada barnaamijyada siyaasadda, kuwaas oo muwaaddinka siinaya codkii uu ku lahaa go'aan qaadashada. Talagelinta muwaaddiniinta iyo bulshooyinka ee dadaallada horumarinta waxa ay kordhinaysaa furfurnaanta, isla xisaabtanka iyo ka qaybgelinta bulshada (World Bank, 2015).[1] Talagelinta muwaaddinka waa arrin muhiim u ah xoojinta isla xisaabtanka, daahfurnaanta iyo kalsoonida lagu qabo hay'adaha dawladda. Sida ku xusan warbixintii Qaramada Midoobay ee **"People Matter" (2008)**, talagelin muwaaddin oo wax ku ool ah waxa ay aasaasi u tahay dawlad wanaagga. Waxa ay madaxda siinaysaa xog wanaagsan oo wax ka tari karta go'aan qaadashadooda, horumarinta barnaamijyada iyo bixinta adeegyada.

In muwaaddiniinta laga talageliyo naqshadaynta iyo fulinta barnaamijyada adeeg bixinta waxa ay xaqiijisaa in adeegyadu noqdaan kuwa ka jawaaba baahihiyii gaarka ah ee bulshada, taas oo sare u qaadaysa wax ku oolnimada iyo hufnaanta bixinta adeegyada iyada oo sidoo kale kordhinaysa isla xisaabtanka iyo daahfurnaanta (Bhargava, 2015). Iyagoo ka qaybgelinaya muwaaddinka go'aan qaadashada, dawladaha waxaa lagula xisaabtami karaa adeegyada iyo go'aannada ay gaaraan, taas oo horseedda adeegyo guud oo tayadoodu fiican tahay, kana jawaabaya baahiyaha dadka, iyada oo, sidoo kale, sare u qaadaysa kalsoonida muwaaddiniinta ee dawladdooda. Intaa waxaa sii dheer, talagelinta muwaaddinka waxa ay xoojisaa heshiiska bulshada ee u dhexeeya muwaaddiniinta iyo dawladahooda iyadoo muujisa in dawladdu dhagaysato oo wax ka qabato baahiyaha iyo tabashooyinka muwaaddiniinta.





*Jaantus 1: Muhimadda ay leedahay talagelinta bulshada*

*Ka qaybgelinta muwaaddiniinta ee geeddi-socodka siyaasad dejinta waxa ay sare u qaadi kartaa adeeg bixinta iyada oo xaqiijinaysa in siyaasadaha guud iyo adeegyadaba ay yihiin kuwa loo naqshadeeyay in ay daboolaan baahiyaha iyo arrimaha hortebinta u leh dadweynaha. Geeddi-socodyada laga wada qaybgalo sida kulamada bulshada iyo wada-tashiyada waxa ay muwaaddinka siin karaan fursad wax ku biirin iyo jawaabcelin taas oo dhalinaysa natiijo wanaagsan.*

Dawladaha adduunka ayaa qaatay nidaamka dawladda danabaysan (e-governance) si looga faa'iidaysto xogta iyo nidaamyada teknoolojiyada, sarana loogu qaado hawlaha iyo adeeg siinta muwaaddiniinta. Isbeddelkan ayaa waxa uu keenay in faa'iidooyin la taaban karo oo ay ka mid yihiin hufnaan sare, wax ku oolnimo, iyo fursado ka qaybgal bulsho, taas oo ugu danbayntii horseedaysa sare u qaadidda hannaanka dawladnimada. Tusaalooyin dhowr ah ayaa muujinaya sida talagelinta bulshada loogu adeegsaday in muwaaddinku uu qayb ka noqdo dhinacyo kala duwan oo lagu horumarin karo bixinta adeegyada.

## Aragtiyaha Dunida ee Talagelinta Bulshada iyo Qaabaynta Bixinta Adeegyada Dawladda

Talagelinta bulshada ayaa waxa ay noqotay hababka aasaasiga ah ee dalal badan u adeegsadeen sidii loo xoojin lahaa dawlad wanaagga, loona horumarin lahaa bixinta adeegyada guud. Habkan hal-abuurka leh ayaa waxa uu xoogga saarayaa qaabaynta go'aannada siyaasadaha iyo saamaynta tooska ee dadweynuhu ku yeelanayo bixinta adeegyada, taas oo abuuraysa nidaam dawladeed oo ka jawaaba baahiyaha dadka, lalana xisaabtamo. Qaybaha hoose waxaa ku xusan daraasado dunida dacalladeeda kala duwan laga sameeyay oo muujinaya sida talagelinta bulshada loogu adeegsaday sare u qaaddida adeeg bixinta iyo dhismaha heshiis bulsho oo lala yeesho muwaaddiniinta.




## 01 Rahvaalgatus.ee, ("Hindisaha Dadweynaha"): Estonia

Estonia ayaa waxa ay samaysay madal dawlad danabaysan oo dijitaal ah oo loogu yeeray, **Rahvaalgatus.ee** ("Hindisaha Dadweynaha"), kaas oo adeegyo dawladeed oo hufan u bixiya si ammaan leh oo adeegsadeyaashana u fudud. Madashan ayaa waxa ay awood u siinaysaa muwaaddiniinta in ay si firfircoon ugu qaabeeyaan siyaasadaha iyo shuruucda iyaga oo soo jeedinaya, ka doodaya, si wadajar ahna u turxaanbixinaya shuruucda cusub. Baarlamaanka Estonia ayaa waxa uu muujinayay in ay si adag uga go'an tahay in si dhab ah u qaato soo jeedinta lagu soo gudbiyo madasha, iyaga oo jawaab celitna madasha ka timaadda lagu biiriyo geeddi-socodka sharci dejinta, taas oo dib u xoojinaysa habsami u socodka hannaanka dimuqraadiyadda ee dalka.[2]

1. Strategic Framework for Mainstreaming Citizen Engagement in World Bank Group Operations

2. https://europa.eu/citizens-initiative-forum/blog/five-factors-success-behind-estonias-citizen-empowering-platform_en

## 02 My Gov: India

Hannaan kale oo talagelinta bulshada loo adeegsado ayaa ah MyGov, oo ay daahfurtay dawladda India sanadkii 2014. Hannaankan ayaa xoojinaya talagelinta bulshada iyada oo loo oggolaanayo muwaaddiniinta in ay jawaab celin bixiyaan, talo-jeedin sameeyaan, aragtiyahadoodana ka dhiibtaan siyaasadaha dawladda iyada oo la adeegsanayo aaladaha ra'yi ururinta, sahan cilmi-baaris iyo blog-yada. MyGov waxa uu muwaaddiniinta ku dhiirrigeliyaa in ay ka qaybqaataan mashaariicda qaran ayna soo gudbiyaan aragtiyahadooda ku aaddan arrimaha dawladda. Iyada oo ay ka diiwaangashan yihiin wax ka badan 16 malyan oo qof, madashani waxaa soo gaaray 678,000 oo farriin ah oo ku kala baahsan 885 hawlood iyo ku dhowaad 4 malyan oo faallo ah oo lagu soo qoray 822 madal doodeed.[3] Guusha MyGov waxa ay muujisay muhimadda ay u leedahay talagelinta bulshada sidii sare loogu qaadi lahaa adeeg bixinta dawladda iyo xoojinta dawlad wanaagga.

## 03 Hannaanka Porto Alegre ee Miisaaniyadda Laga Wada Qaybgalo: Brazil

Hannaanka Porto Alegre, oo markiisii hore laga billaabay magaalada Porto Alegre ee dalka Barazil horraantii 1990-aadkii, ayaa waxaa qayb ka ah hannaan ka qaybgal miisaaniyadeed oo muwaaddiniinta lagu dhiirrigeliyo in ay si firfircoon uga qayb qaataan qoondaynta dhaqaalaha guud.[4] Hannaankan marka la adeegsanayo, muwaaddiniintu waxa ay soo jeedin karaan talooyin ku aaddan sida loo adeegsanayo maaliyadda guud. Talooyinkaas ayaa waxaa la geliyaa doodo, oo kaddibna ay u codeeyaan muwaaddiniinta. Hannaankan ayaa caddeeyay in uu yahay mid wax ku ool ah oo sare loogu qaadi karo talagelinta bulshada ee dawladnimada, iyada oo uu gacan ka gaystay in loo qoondeeyo khayraadka guud si xaqsoor leh.

## 04 Xafiiska Hal-abuurka ee Seoul: Koonfurta Kuurya

Koonfurta Kuuriya, madasha[5] **"e-People"** ayaa wax weyn ka beddeshay wada shaqayntii muwaaddinka iyo dawladda iyada oo u suurtogelisay muwaadiniinta in ay soo gudbiyaan cabashooyinka oo ay si toos ahna u siiyaan jawaab-celin hay'adaha dawladda, taas oo horseedday sare u kaca jawaabaha dawladda iyo in dhibaatooyinka loo xalliyo si wax ku ool ah. Waxyaabaha uu la gaarka yahay Xafiiska Halabuurka Seoul ayaa ah in ay ka go'an tahay in ay muwaaddiniinta ka qaybgeliyaan ugu horreyntii billowga mashruuca, iyo abuuridda jawi muwaaddiniintu ay si firfircoon uga qaybgeli karaan geeddi-socodka maamulka, laga billaabo go'aan qaadashada ilaa fulinta. Hannaankan ayaa midaynaya geeddi-socodka xafiisyada dawladda, kuna dhiirrigelinaya muwaaddiniinta in ay gacan ka gaystaan helidda xalal kale, taas oo kobcinaysa hannaan dawladnimo oo hufan la iskana kaashado.

## 05 Barnaamijka Itoobiya ee Islaxisaabtanka Bulsheed

Afrika dhexdeeda, Barnaamijka Islaxisaabtanka Bulsheed ee Itoobiya (ESAP) wuxuu adeegsadaa talagelinta muwaaddiniinta si kor loogu qaado adeegga dawladda ee Itoobiya. Wuxuu xoogga saaraa abuuridda qaab-dhisyo iyo hannaan muwaaddiniinta iyo dawladda u oggalaanaya in ay isla falgalaan oo ay wadahadal wax ku ool ah ka yeeshaan dhinacyada ay tahay in mudnaan la siiyo iyo dhinacyada ay mushkilado ka jiraan kuwaas oo ay muwaaddiniintu tilmaan uga bixiyaan marka la joogo heerarka maamulka kan ugu hooseeya oo ah meesha miisaaniyadaha iyo qorshooyinka lagu dejiyo. Barnaamijka waxaa loogu talagalay in uu muwaaddiniinta iyo dawladaha hoose siiyo madal ay uga wadahadlaan tabashooyinka iyo mudnaanta muwaaddiniinta si loo horumariyo adeeg bixinta iyo isla xisaabtanka iyada oo la adeegsanayo talagelinta iyo xog-wadaagga muwaaddiniinta.[6]

Maaddaama ay Soomaaliya marayso marxalad hore oo ah dib-u-dhiska qaab-dhismeedka hannaanka dawladnimo iyo dejinta siyaasadaha, barnaamijka talagelinta muwaaddiniintu wuxuu muhiim u noqon karaa horumarinta islaxisaabtanka iyo daahfurnaanta. In kasta oo ay jiraan caqabado siyaasadeed iyo kuwo dhaqaale oo waaweyn, haddana muwaaddiniinta Soomaaliyeed waxay si firfircoon uga qaybqaateen hindisayaal kala duwan oo lagu horumarinayo adeeg bixinta iyagoo bixinaya adeegyo muhiim ah, sida waxbarasho, adeeg biyo iyo caafimaad.

Ururada bulshada, kuwa horumarinta iyo hay'adaha caalamiga ah ayaa door muhiim ah ka ciyaaray bixinta adeegyada muhiimka ah ee meelaha magaalooyinka ka fogfog oo ay colaaduhu saameeyeen oo aysan dawladdu joogin. Intaa waxaa




3. https://www.researchgate.net/publication/339664718_Platform_for_Citizen_Engagement_for_Good_Governance_in_India_A_Case_Study_of_MyGovin
4. https://www.wri.org/research/porto-alegre-participatory-budgeting-and-challenge-sustaining-transformative-change
5. GovInsider: https://govinsider.asia/intl-en/article/inside-seouls-innovation-unit
6. Ethiopia Social Accountability Program: https://www.vng-esap.org/whatwedo

dheer, ururrada bulshada rayidka ah ee Soomaaliya oo firfircoon waxay door muhiim ah ka ciyaareen dib-u-dhiska dawladda iyo u ololaynta maamul-wanaagga, abaabulidda agabka mashaariicda horumarineed, iyo la xisaabtanka masuuliyiinta. Hindisooyinka talagelinta muwaaddiniinta waa in ay casharro ka qaataan dadaalladan dadweyne si loo ballaariyo talgelinta bulshooyinka loogana qaybgeliyo geeddi-socodka go’aan-qaadashada.

Si kastaba ha ahaatee, xasillooni-darrada joogtada ah ee Soomaaliya iyo kala qaybsanaanta siyaasadeed ayaa xaddidday baaxadda iyo waxtarka hindisayaasha ka-qaybgalka muwaadiniinta. La’aanta qaab-dhismeed sharci iyo mid hay’adeed oo shaqaynaya ayaa ka dhigtay mid ku adag in muwaadiniintu ay si buuxda uga qaybqaataan hababka go'aan qaadashada. Intaa waxaa dheer, nabadgelyo-xumada iyo rabshadaha ayaa xannibay dhaqdhaqaaqyada bulshada, gaar ahaan meelaha ay ka taliyaan kooxaha hubaysan. Iyadoo ay jiraan caqabadahaas, talgelinta muwaaddiniinta ayaa weli ah mid muhiim u ah horumarinta adeeg bixinta muwaaddiniinta Soomaaliya.

## Xaaladda Adeeg Bixinta iyo Talagelinta Muwaaddiniinta ee Soomaaliya

Ka dhawaad soddon sano oo dagaallo sokeeye ay ka socdeen Soomaaliya, dalku wuxuu si tartiib tartiib ah ugu gudbayaa xaaladda colaadaha ka dib. Dagaallo sokeeye oo sanado badan socday ayaa waxay sababeen in ay Soomaaliya ku sigato in ay gebi ahaan wada burburto iyada oo dagaallada ay dad badan ku barakaceen, kaabayaasha dhaqaaluhuna ku burbureen. Dhibaatooyin kale oo ay ka mid yihiin abaaro daran, fatahaado, cudurro, iyo maleeshiyada Al-Shabaab ayaa caqabad ku ah ka soo kabashada dagaalka.


Si kastaba ha ahaatee, sannadihii u dambeeyay, Soomaaliya waxay horumar la taaban karo ka samaysay dib-u-dhiska hay’adaha dawladda si loo horumariyo adeegga bulshada. Hase ahaatee, in kastoo horumarkaas la sameeyay, caqabado waaweyn ayaa weli ka jira bixinta adeegyo hufan oo waxtar u leh dadka Soomaaliyeed. Xaaladda siyaasadda iyo amniga Soomaaliya ayaa weli ah mid aan xasilloonayn. Sidoo kale, in kastoo ay jiraan horumarro wanaagsan oo laga gaaray is-beddelka siyaasadeed ee Soomaaliya, haddana jawiga siyaasadeed ee dalka ayaa weli khalkhalsan, iyadoo ay jiraan arrimo aan weli xal laga gaarin oo ku saabsan xiriirka Dowladda Federaalka iyo dowlad goboleedyada.

Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo dowladaha xubnaha ka ah ayaa ku dadaalaya sidii ay u horumarin lahaayeen adeegyada muhiimka ah balse waxaa jira gaabis ay sababeen dawladda Soomaaliya oo aan dhaqaale u qoondayn miisaaniyadda qaranka, caqabado amni, iyo qaab-dhismeedka hay’adaha dawladda oo taag daran, taas oo keentay in NGO-yadu ay hadda bixiyaan adeegyo muhiim ah, sida adeeg caafimaad, biyo iyo waxbarasho. Horumarinta adeeg bixinta Soomaaliya waxay u baahan tahay habab dhinacyo badan leh oo wax looga qabanayo caqabadaha soo wajaha adeeg-bixiyayaasha. Waxay u baahan tahay maalgashi joogto ah, xoojinta heshiisyada bulshada, hagaajinta maamulka, iyo xasilloonida si loo hubiyo in adeegyada muhiimka ah ay dhammaan dadka Soomaaliyeed heli karaan.

# Barnaamijka Daadihiye ee Talagelinta Muwaaddinka

Madasha Daadihiye ayaa gaartay 2609 qof (1340 rag ah iyo 1269 dumar ah) oo ku nool Muqdisho. Aragtiyo ku saabsan caqabadaha bulshada, dhaqaalaha, iyo degaanka iyo aragtiyaha ku saabsan sida looga faa'iidaysto cashuuraha ayaa la diiwaangeliyay. Waxaan sidoo kale sahminnay sida ay bulshadu ula falgasho dawladda hoose.

Waxaan sidoo kale sahminnay si aan u fahanno waxa ay muwaadiniintu ka filayaan dawladda iyo siyaasad-dejiyeyaasha. Tani ayaa waxaa looga dan lahaa in la diiwaan geliyo sida muwaadiniintu ay uga qaybqaadan karaan dadaallada horumarineed iyo bixinta adeegyada iyo qayb ka abuuridda xiriir wanaagsan oo dhex mara dawladda iyo muwaadiniinteeda.




Raagsan ayaa bilowday barnaamijka talagelinta muwaaddiniinta ee "Daadihiye" si loo yareeyo kala fogaanshaha u dhexeeya siyaasad-dejiyeyaasha iyo muwaaddiniinta Soomaaliyeed. Daadihiye, waxaa kor loogu qaadaa codadka muwaaddiniinta, waxaana la siinayaa madal ay kaga qaybqaataan hawlaha go’aan qaadashada, taas oo meesha ka saaraysa faraqa u dhexeeya garwadeenka iyo muwaaddiniinta caadiga ah. Daadihiye waxa uu si adag u aaminsan yahay in dib loo milicsado “Siyaasadda Maalinlaha ah” iyada oo la yaraynayo faraqa sii kordhaya ee u dhexeeya muwaaddiniinta iyo madaxda hay’adaha dawladda. Hadafka laga leeyahay waa in la helo hab loo dhan yahay oo ballaaran oo lagu maamulo, laguna kormeero bixinta adeegga dadweynaha iyadoo muwaaddiniinta la dhigayo safka hore ee tixgalinta siyaasad-dejiyeyaasha.

Habkani waa mid muhiim u ah hubinta in muwaaddiniinta awood loo siiyo in ay si macno leh wax ugu biiriyaan geeddi-socodka siyaasad-dejinta oo ay si waafi ah uga muuqdaan geeddi-socodka go'aan-qaadashada.







*Figure 2: Daadihiye engagement channels*

*Daadihiye ayaa qaatay hannaan loo dhan yahay isagoo bixinaya wadiiqooyin lagu maaraynayo aragtiyaha kala duwan ee bulshada, lagu ururinayo, laguna gaarsiiyo daneeyeyaasha si looga doodo caqabada jira, jid cusubna loogu furo bulshooyinka.*

## Aragtida Isbeddelka ee Daadihiye

Qaab-dhismeedka Daadihiye waxaa xuddun u ah afar qaybood oo waaweyn: Wada naqshadayn, Falanqeyn, Talagelin, iyo Jawaab celin. Qaybta Naqshadeynta waxay xoogga saaraysaa hab iskaashi oo ay muwaadiniinta Soomaaliyeed talo ku leeyihiin iyada loo samaynayo madallo ku habboon si tooshka loogu ifiyo daldaloollada aqooneed iyo tabashooyinkooda si taladooda wax loogu xalliyo. Qaybta talagelinta waxay diiradda saartaa talgelinta muwaaddiniinta iyada oo loo marayo kanaallo kala duwan, oo ay ku jiraan raadiyaha maxalliga ah, podcastiyo, wargeysyo, iyo warbaahinta bulshada, si loo kobciyo wada-hadalka iyo abuurista fursado ka qaybgal oo macno leh. Ugu danbayntii, qaybta jawaab-celintu waxay lamahuraan u tahay xiritaanka wareegga jawaab-celinta, iyadoo la isticmaalayo khadadka taleefoonnada iyo golayaasha bulshada si kor loogu qaado xiriir wax ku ool ah, loona hubiyo in codadka muwaaddiniinta la maqlo laguna dhaqmo. Iyada oo qaybahan ay wada shaqeynayaan, hannaanka Daadihiye wuxuu adeegsadaa farsamooyin iyo habab dhammaystiran oo wax ku ool ah oo lagu xoojinayo muwaaddiniinta Soomaaliyeed si ay isbeddel wanaagsan ugu horseedaan bulshooyinkooda.






*Jaantus 3: Aragtida Isbeddelka ee Daadihiye*

Hannaanka Daadihiye waxa uu beegsanayaa inuu u ka dhigo ka qaybgalka ballaaran ee muwaadiniinta Soomaaliyeed caddeymo dhaqangal ah oo si wax ku ool ah u wargelin kara horumarinta siyaasadaha, barnaamijyada, iyo adeegyada. Hadafka ugu dambeeya waa in muwaadiniinta awood loo siiyo in ay kaalin firfircoon ka cayaaraan qaabeynta siyaasadda iyo naqshadeynta barnaamijka iyada oo la kobcinayo wadahadal caddaymo ku salaysan oo gacan ka geysta dawladnimada iyo habka bixinta adeegga ee Soomaaliya.

Madashani waxa ay adeegsataa hannaan dhammaystiran oo ay ka mid yihiin la shaqaynta muwaadiniinta iyo daneeyayaasha, samaynta xog ururin ballaaran, iyo falanqayn qaabaysan iyada oo la isticmaalayo hannaan wax ka barasho si loo gaaro yoolkan. Habkan ayaa sidoo kale ku lug leh soo gudbinta aqoonta iyada oo loo marayo faallooyinka siyaasadda, wargeliyayaasha iyo u qaabaynta aragtida iyo xogta muwaadiniinta isdhexgal dhaqangal ah iyada oo loo marayo wadahadal. Iyadoo la dhaqangelinayo habkan, madashu waxa ay siinaysaa hab awood leh oo u sahlaya u siinay muwaadiniinta Soomaaliyeed in ay kaalin mug leh ka qaataan horumarinta bulshadooda, iyaga oo horseedaya isbeddel wanaagsan oo faa'iido u leh qof kasta.

## Tijaabada Talagelinta Bulshada ee Muqdisho

Marxaladda tijaabada bulshada ayaa aruurisay codadka 2609 qof oo ku nool 17 degmo oo Muqdisho ka tirsan. Raagsan waxay hawlgelisay 11 shaqaale adeeg bulsho oo heer jaamacadeed ah, oo muddo laba bilood ah la tababaray, kuwaas oo xirfad iyo fahan qoto dheer u leh xaaladda dalka. Waxa ay diiwaangeliyeen arrimaha soo socda:

- Caqabadaha muwaadiniinta ee dhanka adeeg bixinta
- Adeegyada ay bulshadu u baahan tahay
- Is-dhexgalka u dhexeeya dadka deegaanka iyo dawladda hoose

Natiijooyinka ayaa lagu soo bandhigay Dashboard-ka Daadihiye, kaas oo muuqaal ka bixinaya natiijada ka soo baxday degmooyinka Muqdisho.




Waxaad dashboard-kan ka geli kartaa link-gan:
Dashboards – Daadihiye Citizen Engagement

*Jaantus 4: Jaantuska Daadihiye*

## Natiijooyinka muhiimka ah ee ka soo baxay sahanka cilmi-baarista

### 01 Caqabadaha ay soo gudbiyeen dadka deggan Muqdisho

Natiijooyin dhowr ah oo muhiim ah ayaa soo baxay ka dib markii ay xiriireen dad kala duwan oo deggan iyo bulshooyinka Muqdisho. Natiijooyinkani waxay bixinayaan fikrado qiimo leh oo ku saabsan caqabadaha ay muwaadiniintu la kulmaan, adeegyada loo baahan yahay, iyo sida ay ula tacaamulaan maamulada maxalliga ah ee magaalada. Natiijooyinkan ayaa hoosta ka xarriiqay meelaha ay lagama maarmaanka u tahay waxqabad wadajir ah si kor loogu qaado tayada nolosha dhammaan dadka degaanka.

| | |
|---|---|
| Caqabado Bulsho | • Dhac<br>• Caddaalad<br>• Faqri<br>• Waxbarasho<br>• Dayeel Caafimaad |
| Caqabado Dhaqaale | • Shaqo la'aan<br>• Sicir bararka<br>• Qiimaha cuntada oo sarreeya<br>• Kaabayaasha dhaqaalaha oo liita |
| Caqabado Deegaan | • Maaraynta qashinka oo liidata<br>• Wasakhowga caagga<br>• Wasakhowga biyaha<br>• Marinada biya roobka oo liita |

*Jaantus 5: Caqabado ay sheegeen dadka reer Muqdisho*

*Dhac/Amni xumo, shaqo la'aan iyo Maaraynta qashinka oo liidata ayaa ahaa caqabadaha ugu waaweyn ee bulsho, dhaqaale, iyo deegaan oo ay dadka Muqdisho soo wariyeen.*

Dhaca iyo Amni darrada ayaa ah caqabadaha ugu badan ee lasoo tebiyay ee ay in badan oo ka mid ah bulshada Muqdisho la kulmeen. Baahsanaanta dambiyada iyo rabshadaha ee ka jira meelo ka mid ah magaalada ayaa si weyn u saameeyay nolol maalmeedka dadka, iyaga oo xaddiday awooddooda ay si xor ah ugu socdaan una helaan adeegyada muhiimka ah. Heerka shaqo la'aanta oo sarreysa iyo fursadaha shaqada oo xaddidan ayaa sidoo kale lagu xusay in ay tahay caqabad dhaqaale oo muhiim ah, gaar ahaan dhalinyarada, taasoo keentay in dad badan oo deggani ay la halgamaan sidii ay nolol-maalmeedkooda u dabooli lahaayeen oo ay u masruufi lahaayeen qoysaskooda. Maareynta qashinka oo liidata ayaa sidoo kale loo aqoonsaday inay tahay caqabad weyn oo dhanka deegaanka ka jirta. Qashinka oo aan si habboonayn loo maarayn ayaa keenaya dhibaato caafimaad iyo mid deegaan, gaar ahaan meelaha ay ku nool yihiin dadka saboolka ah oo helitaanka adeegyada muhiimka ahi ay xaddidan yihiin.

### 02 Adeegyada loo baahanyahay

Bixinta adeegyada daboolaya baahiyaha bulshada ayaa muhiim u ah in dawladuhu xaqiijiyaan bixinta adeeg hufan. Baaritaanka tijaabada ah ayaa lagu diiwaangeliyay adeegyada dhaqan, dhaqaale, iyo deegaan ee dadka ku nool Muqdisho ay uga baahan yihiin dowladda iyo hay'adaha gaarka loo leeyahay in ay bixiyaan.

Waxbarasho tayo leh, daryeel caafimaad oo jaban, kaabayaal waddooyin oo hagaagsan, ururinta iyo maareynta qashinka ayaa ahaa adeegyada ugu waawayn ee ay u baahan yihiin dadka Muqdisho.

| | |
|---|---|
| Adeegyo bulsho | • Waxbarasho Tayo leh<br>• Daryeel Caafimaad hagaagsan<br>• Amni<br>• Koronto Jaban |
| Adeegyo dhaqaale | • Kaabayaal Wadooyin oo Hagaagsan<br>• Xirfad Dhis iyo Tababar<br>• Helid Internet |
| Adeegyo deegaan | • Adeegyada ururinta iyo maareynta qashinka<br>• Barnaamijyada dib-u-warshadaynta caagga<br>• Ilaalinta Tayada Biyaha |

*Jaantus 6: Adeegyada ay u baahan yihiin dadka Muqdisho*

## 02 La falgalka dawladda

Ka talagelinta muwaadiniinta ee dawladda hoose waa arrin muhiim u ah hannaanka dawladnimada in laga wada qaybgalo. talada muwaadiniinta ee go'aan qaadashada waxay xaqiijisaa in siyaasadaha iyo barnaamijyada dawladdu ay ka tarjumaan baahiyaha iyo rabitaanka bulshada. Marka muwaadiniintu ay si firfircoon uga qayb qaataan go'aan qaadashada, waxay heleyaan dareen lahaanshiyo iyo in ay la xisaabtamaan siyaasadaha iyo barnaamijyada la hirgaliyay. Cilmi-baaristeenu waxay diiradda saartay sidii aan u ogaan lahayn sida muwaadiniinta Muqdisho ay ula falgalaan dawladda hoose iyada oo laga eegayo saddex mawduuc oo waaweyn.

- Canshuuraha ay bixiyaan muwaadiniinta iyo isticmaalkeeda
- La falgalka dawladda
- Matalaadda dawladda hoose

In kastoo wax ka badan kala bar jawaab-bixiyeyeaashu ay bixiyaan canshuuro, haddana badankood waxa ay qeexeen in aysan ka war hayn halka dawladdu ay ku bixiso canshuurtaas. Sidoo kale, waxay tilmaameen in qoondaynta lacagaha canshuuraha aysan waafaqsanayn baahiyahooda aasaasiga ah. Natiijooyinka ka soo baxay sahanka ayaa muujiyay wada shaqayn xaddidan oo ka dhaxaysa muwaadiniinta iyo dawladaha hoose. Arrintan ayaa loo aaneeyay ka warqabka xaddidan ee muwaadiniinta u leeyihiin doorka dowladda iyo adeegyada ay tahay in dowladdu bixiso. Intaa waxaa sii dheer, xubnaha bulshadu ma rabaan, waxaana xaddidan awood ay si firfircoona ugula falgalaan ulana tashadaan nidaamyada dawladeed ee jira.

Sahanka Cilmi-baariseed ee Daadihiye waxa ay diiwaangelisay wacyi-gelin la'aanta xooggan ee bulshadu ayna uga warhaynin muhiimadda ay leedahay talgelinta bulshada taas oo keenaysa falgal heerkeedu hooseeyo. Intaa waxa dheer, nabadgelyo-xumadu waxay caqabad weyn ku ahayd muwaadiniinta inay si nabadgelyo ah ula macaamilaan dawladaha hoose. Jawaab bixiyayaasha ayaa sidoo kale iftiimiyay in kalsooni la'aanta baahsan ee ka jirta hay'adaha dawladdu ay ka niyad jabisay muwaadiniinta inay ku lug yeeshaan nidaamka dawladaha hoose. Sidoo kale, nidaamyada iyo kaabayaasha daciifka ah ee dawladda ayaan saamaxaynin inay muwaadiniintu helaan macluumaad ay wadahadal macno leh ula yeeshaan saraakiisha maxalliga ah. Rabitaan la'aanta bulshada ee ka qaybqaadashada ayaa sidoo kale la xusay. Taa ayaana loo aaneynayaa arrimo kala duwan oo ay ka mid yihiin niyad jabka bulshada ee ku aaddan dawladda, faham la'aanta faa'iidada ay leedahay wada tacaamulku, iyo baahiyaha kala duwan ee taagan. Ugu dambayn, dadka baahiyaha gaarka ah qaba oo ay ka qayb-qaadashadoodu yar tahay ayaa sii xumaysay ka qaybgalka xaddidan, maadaama muwaadiniinta naafada ahi ay wajahayaan caqabado dheeraad ah, si ay u helaan adeegyada dawladda ulana falgalaan saraakiisha maxalliga ah.





*Figure 7: Maxay bulshooyinka uga qaybqaadan la'yihiin hindisayaasha talagelinta*

## Casharrada La Bartay

Cilmi-baarista tijaabada ah ee Daadihiye ee Muqdisho waxa ay bixisay casharro qiimo leh oo la bartay si loo hirgeliyo loona ballaariyo dadaallo waara oo waxtar leh kuna aaddan la falgalka bulshada.

### Waaqaca iyo in loo wada dhanyahay ayaa macno samaynaya

Nidaamku waa inuu noqdaa mid loo dhan yahay, iyadoo la hubinayo in dadka la takooro iyo kuwa nugul ay ka qaybqaadan karaan hawlaha madaniga ah, lana macaamili karaan dawladaha hoose, ixtiraamaanna aragtiyaha iyo khibradaha kala duwan.

### Ka qayb galka bulshadu waa muhiim

Hindisaha ka-qaybgalka muwaadinku waa in si firfircoon looga qaybgeliyo xubnaha bulshada loona abuuro fursado ay muwaadiniintu ku dhiiban karaan ra'yigooda, kana bixiyaan jawaab celin iyo fikrado ku saabsan siyaasadaha iyo barnaamijyada, iyo ka qayb galka go'aan qaadashada.

### Waxaa loo baahan yahay in la cabbiro isticmaalka kanaalada kala duwan

Si wax ku ool ah looga qaybgeliyo muwaadiniin, hal-abuur leh. Tani waxay u baahan tahay ka faa'iidaysiga kanaalada dhaqameed sida shirarka bulshada iyo kanaalada dhijitaalka ah sida baraha bulshada iyo codsiyada taleefanka gacanta. Isticmaalka isku dhafka kanaaladan waxay hubisaa in akhbaartu ay gaari karto dhegeystayaal ballaaran oo muwaadiniintu ay helaan fursado ku filan oo ay ku helaan macluumaadka iyo la macaamilka dawladahooda hoose.

### Kala duwanaansho dhaqamada

Hindisaha talgelinta muwaaddiniintu waa in uu ahaado mid xisaabta ku darsada oo ixitiraama dhaqamada iyo caado dhaqameedyada maxalliga ah. Tan waxaa ka mid ah in la aqoonsado muhiimada caadooyinka dhaqanka si loo qaabeeyo aragtida muwaadiniinta ee dawladahooda hoose iyo hubinta in hawlaha ka qayb galku inay ka turjumayaan dhaqamada maxalliga ah.

### Helitaanka macluumaadku waa lagama maarmaan

In la siiyo muwaadiniinta xog ku saabsan siyaasadaha, barnaamijyada, iyo hababka go'aan qaadashada ee dawladda ayaa looga baahan yahay si loo hubiyo in muwaadiniintu si wax ku ool ah ula macaamilaan dawladahooda hoose. Xog la heli karo ayaa dhiirigelisa ka qaybgalka iyo la falgalka dadwaynaha ee maamulka. Marka ay muwaadiniintu helaan xogta, waxay si firfircoon uga qayb qaadan karaan doodo, soo jeedin karaan xalal, kalana shaqayn karaan masuuliyiinta inay wax ka qabtaan caqabadaha haysta bixinta adeegga dadweynaha.

### Maareynta rajada muwaadinku waa muhiim iyadoo baahiyaha loo eegaayo agabka/maalgelinta la heli karo

Talagelinta wax-ku-oolka ah ee muwaadiniintu waxa ay u baahan tahay maaraynta rajada iyadoo la isku dheelitirayo baahiyaha iyo rabitaanka muwaadiniinta ee agabka/khayraadka iyo maalgelinta diyaarka ah. Waa muhiim in si hufan loo muujiyo gaabiska jira, si cadna loogu sheego muwaadiniinta waxa dhabta ah ee la gaari karo.

## Kor-u-qaadista iyo Qaabaynta Daadihiye

Daadihiye waa hab dabacsan oo loo qaabayn karo si ku habboon baahiyaha iyo mawduucyada gaarka ah ee la-hawlgalayaasha iyo macaamiisha kala duwan. Daadihiye waxa uu rabaa inuu juqraafi ahaan iyo mawduuc ahaanba is ballaariyo isaga oo dhisaya iskaashiyo xooggan si loo ballaariyo gaarista hindisayaasha talgelinta muwaadiniinta iyo kor u qaadidda matalaadda loo dhan yahay ee aragtiyo kala duwan iyo danaha bulshooyinka kala duwan ee Soomaaliya.

Ururradu waxa ay ka faa’iidaysan karaan oo ay isticmaali karaan habka talgelinta muwaadinka Daadihiye si ay u dejiyaan una hirgeliyaan barnaamijyo horumarineed oo wax ku ool ah oo waara oo daboolaya baahiyaha iyo mudnaanta bulshooyinkooda.

Tan waxa lagu gaari karaa iyada oo laga faa’iidaysto habka baaxadda weyn ee hawlgelinta muwaadinka ee Daadhiye si uu ula macaamilo muwaadiniinta iyada oo la adeegsanayo waddooyin badan sida idaacadaha maxalliga ah, podcast, wargeysyo, iyo baraha bulshada. Tani waxa ay u sahlaysaa la-hawlgalayaasha in ay falcelin iyo wax ku biirin ka helaan muwaadiniinta ka qaybqaadanaysa barnaamijyadooda, iyaga oo xaqiijinaaya inay ka turjumaayaan baahiyaha iyo filasha muwaadiniinta. Tan waxaa lagu samayn karaa la-tashi, dood wadaagyo, iyo qaabab kale oo talgelin ah.

## Talooyin

Talooyin ku wajahan siyaasad-dejiyeyaasha iyo daneeyayaasha oo ku saabsan sida kor loogu qaadayo loona xoojin karo talagelinta muwaaddinka ee adeeg bixinta.

### 01 In la sameeyo lana hirgeliyo siyaasadaha talagelinta muwaadiniinta oo dhamaystiran

Dowladda Federaalka ah iyo dowladaha xubnaha ka ah, ururrada caalamiga ah/hawlgalayaasha horumarinta iyo kuwa aan dawliga ahayn, iyo adeeg bixiyayaasha waa in ay dejiyaan oo ay hirgeliyaan siyaasadaha iyo habraacyada hawlgelinta halbeegga ah si ay u hagaan adeeg bixinta iyo kor u qaadida talgelinta muwaadiniinta ee dhammaan heerarka adeeg bixinta. Dhaqan gelinta waxyaabaha sahlaya ka qaybgalka, sida kulamada bulshada iyo wada tashiga, si loo ururiyo ra'yi-celin iyo talooyinka dadweynaha ee abuuritaanka iyo fulinta siyaasadaha iyo adeegyada dawladda ee loo baahan yahay. Intaa waxaa sii dheer, in dadwaynaha laga qaybgeliyo qorshaynta iyo go'aan qaadashada waxa ay xaqiijin kartaa in adeegyada lagu jaangooyay baahiyaha muwaadiniinta.

### 02 In la aasaaso habab falcelin

In kor loo qaado talgelinta muwaaddiniinta lana hubiyo habab falcelin oo wax ku ool ah, wana lama huraan in la sameeyo nidaamyo lagu wargaliyo dhibatooyinka iyo soo jeedinta hormarinno lagu xoojiyo xiriirka ka dhexeeya muwaadiniinta iyo dawladaha hoose. Qodobada mhiimka ah ee guusha waxaa ka mid ah in la naqshadeeyo nidaamyadan bulshada si loo hubiyo dhabnimada, bixinta habab ku qoran luqadaha maxalliga ah, iyada oo la isticmaalaayo waddooyin kala duwan sida SMS, wicitaanka teleefanka, sanduuqyada talo soo jeedinta, iyo siyaabaha kale ee online ka ah, iyo in horyaallada guduhu ay lug ku yeeshaan fududaynta ururinta falcelinta iyo dhiiragelinta ka qaybgalka. Ololo wacyigelin oo la marsiiyo warbaahinta maxalliga ah ayaa muhiim u ah baridda bulshada sida iyo halka laga bixinaayo falcelinta. Falcelinta la ururiyay ayaa qiimo u leh tilmaamidda meelaha u baahan hagaajinta adeeg bixinta iyo si fiican u daboolida baahiyaha dadka.

## 03 In laga faa'iidaysto Tignoolojiyada si kor loogu qaado talgelinta muwaaddinka

Tignoolojiyadu waa aalad awood badan oo lagu fududayn karo talagelinta bulshada iyo hagaajinta adeeg bixinta. Hal-abuurka tignoolajiyada sida appka moobilka ee falcelinta, sahan SMS-ku-salaysan, iyo aaladaha warbaahinta bulshada ayaa sidoo kale fududayn kara faafinta macluumaadka muwaadiniinta ee ku saabsan adeegyada iyo bixinta helitaanka agabka iyo la-tashiga dadweynaha.

## 04 In la maalgeliyo dhismaha xirfadaha

Siyaasad-dejiyeyaasha iyo daneeyayaasha waa inay maalgashadaan kobcinta awoodda muwaadiniinta iyo adeeg bixiyayaasha si ay kor ugu qaadaan talgelinta wax ku ool ah oo macno leh. Tan waxa ku jiri kara barnaamijyo loogu talagalay adeeg bixiyayaasha oo ku saabsan sida si wax-ku-ool ah loola macaamilo muwaadiniinta laguna tababaro muwaadiniinta xuquuqdooda iyo waajibaadkooda.

## 05 In la kobciyo iskaashiga

Iskaashiga ka dhexeeya dawladaha, adeeg bixiyeyaasha, iyo ururada bulshada rayidka ah waxay fududayn karaan talgelin muwaaddin oo waxtar ah.

Iyada oo lawada shaqaynaayo, ururada bulshada rayidka ah iyo daneeyayaashan waxay ka faa'iidaysan karaan awoodahooda iyo khibradahooda si ay u sameeyaan una fuliyaan xeeladaha talgelinta muwaadiniinta, taas oo gacan ka geysan karta fududaynta talagelinta muwaadiniinta iyo hubinta in la maqlo codadka dadka. Ururadani waxay gacan ka geysan karaan ururinta falcelinta dadweynaha, fududaynta doodaha, iyo hubinta in aragtida muwaadiniinta la tixgeliyo xilliga go'aan qaadashada.

## 06 In la maalgeliyo agabka sahlaya talagelinta muwaadiniinta

Dawladdu waxa ay siin kartaa taageero iyo agab hindisaha uu hogaamiyo muwaadinka iyo ururada bulshadu. Tan waxa ku jiri kara maalgelin, tababarro, iyo kaalmo farsamo si ay u helaan xirfadaha iyo awoodda ay si wax ku ool ah ula macaamilaan dawladda oo ay u gaarsiiyaan adeegyo bulshooyinkooda. Maalgelinta kaabayaasha iyo hay'adaha si ay u taageeraan ka qaybgalka muwaadiniinta, sida fagaarayaasha dadweynaha iyo shirarka, halkaas oo muwaadiniintu ku kulmi karaan oo ay ka qayb qaataan hababka go'aan qaadashada. Nidaamyadani waa inay ahaadaan kuwo la heli karo, daah-furan, oo loo dhan yahay, si loo hubiyo in dhammaan muwaadiniinta ay ka qaybqaadan karaan oo baahiyahooda la dhagaysto.

## Gunaanad

Si loo kordhiyo, talagelinta muwaaddiniinta ma sii ahaan doonto wax ay dawladuhu kala dooran karaan. Talagelinta muwaadiniintu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah maamul-wanaagga, maadaama ay awood u siinayso muwaadiniinta inay door firfircoon ka ciyaaraan qaabaynta siyaasadaha iyo hababka go'aan qaadashada. Kordhinta ka qaybgalka muwaadiniinta waxay kor u qaadi kartaa adeeg bixinta Soomaaliya. Talagelin wanaagsan oo lala yeesho muwaadiniinta ayaa keenaysa in la naqshadeeyo lana fuliyo siyaasado wax-ku-ool ah oo ka jawaabayeysa baahiyaha bulshada, isla xisaabtan wanaagsan, ka falcelin, iyo furfurnaanta xafiisyada dawladda. Dawladaha, la-hawlgalayaasha horumarinta, iyo ururada bulshada rayidka ah waa in ay ka go'an tahay abuurista jawi suurtagelinaya talagelinta, oo ay ka mid yihiin bixinta agab ku filan, samaynta habab hufan oo loo dhan yahay, iyo inay diyaar u yihiin inay ku daraan falcelintaa muwaadiniinta go'aamada siyaasadda. Waxaa intaa dheer, dadaallada talagelinta muwaadiniinta in lagu saleeyaa baahiyaha gaarka ah iyo xaaladaha bulshooyinka kala duwan, iyada oo la tixgelinayo arrimaha saameynaya awooddooda si ay si wax-ku-ool ah uga qayb-qaataan.

Barnaamijka talagelinta muwaadinka ee Daadihiye waxa uu ka dhigan yahay tallaabo muhiim ah oo loo qaaday dawladnimo loo dhan yahay oo ka hirgasha Soomaaliya. Daadihiye waxa uu bidhaamiyay xaqiiqada dhabta ah ee muwaadiniinta maxalliga ah, waxana uu iftiimiyay arrimo la xiriira adeeg bixinta iyo is-dhexgalka bulshada iyo dawladda. Tani waxay gacan ka geysan doontaa qaabaynta talagelinta mustaqbalka ee dawladda iyo muwaadiniinta iyada oo la siinayo xalal caddaymo wata, hababka ugu wanaagsan iyo casharrada laga barto si loo helo wada-hadal toos ah iyo wada-shaqeyn dhexmarta dawladda iyo muwaadiniinta si kor loogu qaado isla xisaabtanka bulshada, loona abuuro bulsho xooggan, xog-ogaal ah oo iskuna xiran.

Maadaama ay Soomaaliya wali ku sii jirto waddadii dib-u-dhiska iyo horumarka, talagelinta muwaadinku waa in ay ahaataa mid safka hore kaga jirta siyaadsad-samaynta iyo hirgalinteedaba. Dadaal joogta ah iyo ka go'naashiyo loo qabo wadajirka, iyo hufnaanta ayay Soomaaliya uga faa'iidaysan kartaa awoodda talagelinta bulshada si ay dhamaan dadkeeda ugu dhisto mustaqbal ifaya.

## Tixraacyo


Bhargava, V. (2015). Engaging Citizens and Civil Society to Promote Good Go vernance and Development Effectiveness. ADB Governance Brief, 23(23), 1–8. www.adb.org/

Kaushik, A. S. A. (2020). Innovative Citizen Engagement in Ethiopia During the COVID-19 Pandemic: Radio Shows Promote Accountable Service Delivery. https://www.worldbank.org/en/news/feature/2021/01/25/innovative-citizen-engagement-in-ethiopia-during-the-covid-19-pandemic-radio-shows-promote-accountable-service-delivery

Singh, A., & Kaushik, A. (2020). Platform for Citizen Engagement for Good Governance in India. June 2021, pp. 48–66. https://doi.org/10.4018/978-1-7998-2372-8.ch003

World Bank. (2015). Strategic Framework for Mainstreaming Citizen Engagement in World Bank Group Operations. 65–67.


### Xuquuq

Faalladan kooban waxaa soo saaray shirkadda Raagsan Consulting. Raagsan waa shirkad ka shaqeysa xog-ururinta, bixisana adeegyo la talin istraatiijayadeed, kana shaqeysa guud ahaan Soomaaliya.


*Xuquuqda Daabacaadda © Raagsan Consulting 2023*



RAAGSAN
info@raagsan.com
@raagsan